The Office of
Minnesota Attorney General Keith Ellison
helping people afford their lives and live with dignity and respect • www.ag.state.mn.us

**CODSIGA GUDIGA DIB U EEGISTA XUKUNADA**

Cutubka Dib u Eegista Xukunka (CRU) ayaa wuxuu dib u eegis ku sameeyaa sheegashooyinka in si khaldan loo xukumay ee ka yimaada dadka maxkamadaha gobolka Minnesota ay ku heleen dambiyada culus. Waxaad dalban kartaa dib u eegis iyadoo aan loo eegin haddii ay ku xukuntay maxkamad ama haddii aad dambiga qiratay.

CRU waxay dib u eegi doontaa kiiskaaga kaliya haddii aad buuxinayso shuruudahan:

1. Waa in lagugu xukumay dembi culus (felony) oo ay dacwad kugu soo oogeen Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ama Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmada ee Gobolka Minnesota.

2. Waa inaad soo bandhigto sheegasho macquul ah oo ah in si khalad ah laguugu xukumay dambiga lagugu soo oogay. (Si khalad ah ayaa laguu xukumay haddii aadan gelin dambiga lagugu xukumay ee laguu xabisay.)

3. Waa inay jiraan waxyaabo horseedi kara caddaymo la isku halayn karo oo taageeraya sheegashadaada in si khalad ah laguu xukumay.

**WAA KUWAN WAXYAABAHA AAD U BAAHAN TAHAY IN AADAN OGAATO INTAADAN AQBALIN KA HOR**

Cutubka Dib u Eegista Xukunka Minnesota, oo sidoo kale loo yaqaano CRU, ayaa u shaqeeya in ay yihiin qayb madax banaan oo ka tirsan Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Minnesota. Xeer ilaaliyaha guud waa sarkaalka ugu sareeya fulinta sharciga ee Gobolka Minnesota.

Haddii aad dhammaystirto arjigan, CRU waxay ogolaanaysaa inay qabato dib u eegista hordhaca ah ee kiiskaaga si loo go'aamiyo inaad u qalanto baaritaan qoto dheer oo lagu sameeyo kiiskaaga.

Ka hor intaadan dhammaystirin arjigan, fadlan la soco waxa CRU ay kuu qaban karto iyo waxa aysan kuu qaban karin.

CRU **kuuma noqon karto** qareen. Qareenada CRU waa dacwad oogeyaal. Iyagu maaha qareenada difaaca, kumana matali karaan adiga. Taas micnaheedu waa CRU kuma siin karto talo sharci, oo waxa aad noo sheegtaa kuma jiro mudnaanta ay leeyihiin qareenka-macmiilku.

CRU **waxay** iskaashi la yeelan kartaa adiga ama qareenkaaga si ay u baaraan sheegashadaada ku saabsan dembi ku xukun khaldan iyagoo soo ururinaya caddaymo laga

yaabo inaadan marin u helin, iyadoo la tijaabinayo caddayn laga yaabo inaan la tijaabinin, iyo iyagoo la hadlaya markhaatiyaal iftiimin kara xukunkaaga.

Haddii hadda uu ku matalayo qareen, fadlan la tasho qareenkaaga ka hor intaadan soo dirin arjigan. Qareenkaagu wuxuu hayn doonaa talo muhiim ah oo ku saabsan in ay tahay in aad codsato iyo in kale iyo sida dalbashada CRU ay u saamayn karto dacwadahaaga sharci. Haddii adiga iyo qareenkaagu aad go'aansataan inaad dalbataan CRU, waxaanu la shaqayn doonaa qareenkaaga si aan u soo aruurino macluumaadka ku saabsan kiiskaaga oo waxaanu la wadaagi macluumaadka aan soo ururinay qareenkaaga. CRU kulama soo xiriirayso ilaa qareenkaagu ogolaado mooyee.

CRU waxay ogoshahay inay dib u eegis hordhac ah ku samayso arjigaaga sida ugu dhakhsaha badan ee ay awoodaan. Wakhtiga ay qaadanayso in dib loo eego codsigaagu waxay ku xirnaan doontaa khayraadka CRU heli karto iyo tirada codsiyada aan helnay. CRU waxay muddadiiba mar kuugu soo wargelin doontaa qoraal ahaan xaalada arjigaaga.

Dib u eegideeda hordhaca ah, CRU waxay la xiriiri kartaa dadka aad ku qortay arjigan si ay wax badan uga ogaato waxa ay ogyihiin. CRU waxaa kale oo ay la xiriiri kartaa dacwad oogihii asalka ahaa ee kiiskaaga, dhibanaha, iyo markhaatiyaasha bixiyay macluumaadka ama laga yaabo inay ka markhaati fureen kiiskaaga.

Dib u eegista hordhaca ah ka dib, haddii CRU ay diido arjigaaga caawimada, CRU ayaa isla markiiba soo wargelin doonta adiga ama qareenkaaga, waxaanuna idiin sharixi doonaa sababaha diidmada.

Haddii CRU ay u aqbasho kiiskaaga in lagu sameeyo dib u eegis dhammaystiran, iskaashi ayaanu kula yeelan doonaa adiga ama qareenkaaga si aanu si buuxda u baarno aasaaska sheegashooyinkaaga. Haddii aadan haysanin qareen, adiga oo ogolaaday, ayaa CRU waxaa laga yaabaa inay isku daydo inay kuu hesho qareen ku caawin kara marka ay CRU dib u eegis ballaaran ku samaynayso arjigaaga iyo sheegashooyinkaaga.

Inta lagu jiro howsha baaritaanka, CRU ma ballan qaadi karto inay kaa dhaafto wakhtiyada kama dambaysta ah ee laguu qabtay haddii aad soo gudbisay ama aad damacsantahay inaad soo gudbiso codsiga xukunka-dambiga kadib ah. Haddii aad haysato sheegashooyin sharci oo aad daba socoto, waxaad u baahan doontaa inaad hubiso inaad u hogaansanto dhammaan wakhtiyada kama dambaysta ah ee khuseeya kiiskaaga aan ka ahayn haddii maxkamadu ogolaato inay dhinac u dhigto wakhtiyadan kama dambaysta ah.

Ka hor intaadan buuxin arjiga, fadlan hoos saxeex si aad u muujiso inaad akhriday oo aad fahamtay "Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ogaato Ka hor Intaadan Codsan."

____________________________________________________

Saxiixa Taariikhda

## MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY SI AAN DIB UGU EEGNO CODSIGAAGA

*Jawaabahaaga su'aalahan ayaa naga caawin doona inaan go'aansano haddii Cutubka Dib u Eegista Xukunka ee Minnesota uu awoodi doono inuu tallaabo ka qaado kiiskaaga. Fadlan uga jawaab su'aal kasta sida ugu dhammaystiran ee ugu runsan ee aad karto.* ***Haddii aadan aqoonin jawaabta mid ka mid ah su'aalaha, kaliya sheeg uun in aadan aqoon****. Fadlan* ***DAABAC ama u QOR*** *jawaabahaaga sida ugu faseexsan ee aad awoodo.*

---

**WAX ADIGA KUGU SAABSAN:**

Magaca: ______________________________________________

Aqoonsiga Waaxda Asluubta # (OID) (Department of Corrections ID): ______________

Haddii aadan hadda xirnayn:

Cinwaanka wadada ee hadda: __________________________________

Magaalada, Gobolka, Zip: ____________________________________

Lambarka Taleefanka: _______________________________________

Fadlan ku calaamadee “haa” ama “maya” su'aal kasta.

| | | |
|---|---|---|
| Ma akhrin kartaa Ingiriisiga? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Ma qori kartaa Ingiriisiga? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Ma qof ayaa kuu akhriyaya foomkan? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Ma qof ayaa kuu qoraya foomkan? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Miyaad tahay qof aragga naafo ka ah ama indho la'? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Miyaad tahay qof dhegaha naafo ka ah ama dhego la'? | ☐ Haa | ☐ Maya |
| Miyaad isticmaashaa luuqada calaamadaha si aad u hadasho ama u dhagaysato? | ☐ Haa | ☐ Maya |

Haddii aadan wax ku akhriyi karin, wax ku qori karin, ama ku hadli karin Ingiriisiga, luuqadee ayaad doorbidaysaa?

______________________________________________________________

Miyaad leedahay wax naafonimo ah oo aad rabto inaad wax nooga sheegto? Fadlan jawaabtaada ku qor sanduuqa hoose.

| |
|---|
| |

**WAX KU SAABSAN KIISKAAGA:**

Dambi noocee ah ayaa lagugu xukumay? ________________________________________

Muddo intee le'eg ayuu xukunkaagu ahaa? ______________________________________

Waa goorma taariikhda lagu sii daynayo? ________________________________________

Liis garee dhammaan dadka kale ee kugula eedeysan kiiskan: ______________________

Fadlan calaamadee sanduuq kasta ee oraah kasta **oo run ah**. Waad calaamadin kartaa ilaa inta sanduuq ee aad u baahantahay. Haddii aysan midna ku khusaynin, calaamadee sanduuqa ay ku qoran tahay, "Hadallada kor ku xusan midkoodna aniga ima khuseeyo."

- ☐ Wax lug ah kuma lahayn dambiga la igu xukumay.
- ☐ Waan sameeyey qaar ka mid ah waxyaabihii la igu xukumay, laakiin dhammaantood ma wada samynin.
- ☐ Waxaan sameeyay wax sharci daro ah, laakiin waan sakhraasanaa ama waan daroogaysanaa wakhtiga ay wax dhaceen.
- ☐ Waxaan sameeyay wax sharci darro ah, laakiin waxaan qabaa xaalad saamaynaysa awooddayda wax samaynta ama kala garshada xumaanta iyo samaanta.
- ☐ Waxaan sameeyay wax sharci daro ah sababtoo ah waxaa igu qasbay in aan sameeyo qof kale.
- ☐ Waxaan sameeyay wax sharci daro ah, laakiin wakhti aad u badan ayaan xabsiga ugu jiray.
- ☐ Qoraallada kor ku xusan midkoodna aniga ima khuseeyo.

Sidee laguu xukumay?

- ☐ Xeerbeegti ama garsoore ayaa igu helay dembi markii la i maxkamadeeyey
- ☐ Waxaan qirtay in aan gaystay dambiga ama in aanan ka doodaynin

Miyaad ka markhaati furtay maxkamadaynta? ☐ Haa ☐ Maya

**MAXAAD U WEYDIISANAYSAA CUTUBKA DIB U EEGISTA DAMBIGA IN AY DIB U EEGAAN KIISKAAGA?**

Miyaad sheeganaysaa inaadan galin dambiga aad kor ku qortay?

☐ Haa ☐ Maya

Miyaad sheeganaysaa inaad heshay xukun aan sharci ahayn ama caddaalad darro ah?

☐ Haa ☐ Maya

**Macluumaadka Maxkamada iyo Kiiska**

1. Halkee lagugu xukumay? (Magaalada, Degmada, Gobolka): ______________________
______________________________________________________________________________
2. Lambarka Faylka Maxkamada ee Gobolka: ______________________________________

**Wakiilka Hadda**

Hadda miyuu wakiil kaa yahay qareen?

☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay haa tahay, sheeg magaca qareenkaaga hadda: ____________________________

**La xiriir Hay'adaha in aadan Waxba Galabsan (Innocence Organizations)**

Miyaad la xiriirtay Hay'adaha in aadan Waxba Galabsan (innocence organizations)

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

Haddii ay haa tahay, hay'adee? __________________________________________________

Haddii ay haa tahay, hadda miyey baarayaan kiiskaaga?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma garanayo

**Su'aalaha Ku Saabsan Dambiga**

1. Goorma ayuu dambigu dhacay? ___________________________________________

2. Xagee ayuu dambigu ka dhacay?
(*Tusaalooyinka meelaha qaarkood waxay noqon karaan "gurigayga" ama "kaalin shidaal." Fadlan qor inta badan ee aad ogtahay. Qor cinwaanka haddii aad taqaano.*):

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

☐ Calaamadee sanduuqan haddii aad halkaas joogtay markii uu dambigu dhacay.

3. Yuu ahaa qofka la sheegay in uu yahay dhibanaha?
(*Tusaalooyinka qaarkood ee waxyaabaha aad qori kartid waa "wiilkayga" ama "Heblaayo Hebel Hebel." Fadlan qor dhammaan inta aad ogtahay. Qor magaca qofka oo buuxa haddii aad taqaano.)*:

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

☐ Calaamadee sanduuqan haddii aadan garanayn cidda uu dhibbanuhu ahaa.

4. Sideed ku garanaysaa qofka la sheegay in uu yahay dhibbanaha?
(*Tusaalooyinka qaarkood ee waxyaabaha aad qori kartid waa "waxay ahayd xaaskayga" ama "Waxaan kula kulmay xaflad.")*

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

☐ Calaamadee sanduuqan haddii dhibbanuhu ahaa qof aydaan is aqoonin.

**Su'aalo Ku Saabsan Kiiska Adiga Lagugu soo Oogay**

1. Goorma iyo halkee laguugu qabtay? ______________________________

______________________________________________

2. Waa tee waaxda booliiska ee ku soo xirtay? ______________________________

______________________________________________

3. Maxay ayey xeer ilaaliyaha ama boliisku yiraahdeen waad samaysay si aad u gaysato danbiga? (*Tusaalooyinka qaarkood waa "waxay dhaheen waxaan toogtay Hebel Hebel" ama "ilmahaygii ayaa dhacay waxayna dhaheen waad ruxday."*)

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

4. Sidee ayuu booliisku kuugu xiriiriyay dembiga?
(*Tusaalooyinka qaarkood waa "Joe Smith ayaa wuxuu yiri wuu i arkay anigoo samaynaya" ama "farahayga ayaa laga helay gacanka albaabka" ama "markhaati ayaa sawirkayga ka soo saaray saf."*)

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

5. Fadlan calaamadee sanduuqa ku xiga nooc kasta oo caddayn ah oo loo adeegsaday kiiskaaga. Waxaad calaamadin kartaa ilaa inta sanduuq ee aad u baahantahay.

- ☐ Markhaati ayaa iga soo saaray saf
- ☐ Qof dambiga igula eedaysanaa ayaa sheegay in aan anigu galay dambiga
- ☐ Dhibanaha ayaa sheegay in aan anigu galay dambiga
- ☐ Waxaan la joogay dhibanaha agagaarka xilliga uu dambigu dhacay
- ☐ Booliska ayaa yiri aniga ayaa qirtay
- ☐ Booliiska ama dhakhaatiirta ayaa yiri aniga ayaa ruxay dhibane ilmo yar ah
- ☐ Qof aan xabsi kula jiray ayaa sheegay in aan anigu qirtay
- ☐ Qof aan banaanka ka aqaano ayaa sheegay dambiga in aan galay
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay farahayga ka heleen goobta dambiga lagu galay
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay raadkayga ka heleen goobta dambiga lagu galay
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay timahayga ka heleen goobta dambiga lagu galay
- ☐ Booliiska ama dhakhaatiirta ayaa yiri waxaan sababay dhaawacyo aniga oo ruxay ilmo yar
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay shahwadayda (biyahayga) ka heleen goobta dambiga lagu galay
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay shahwadayda (biyahayga) ka heleen dhibbanaha
- ☐ Booliska ayaa waxay sheegeen inay candhuuftayda ka heleen goobta dambiga lagu galay

- ☐ Booliska ayaa waxay sheegeen inay candhuuftayda ka heleen dhibanaha
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay dhiigayga ka heleen goobta dambiga lagu galay
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay iga heleen DNA-ga dhibanaha aniga dushayda ama alaabtayda
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay iga heleen qaniinyada ilkaha dhibanaha oo igu taalla
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen inay dhibanaha ka heleen calaamadaha qaniinyada ilkahayga
- ☐ Booliiska ayaa waxay sheegeen in aan haystay hantida ama alaabtii dhibanaha

U isticmaal meeshan in aad noogu sheegto wixii caddaymo kale oo muhiima ah oo boolisku ku helay baaritaanka kiiskaaga:

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

**Caddaymo cusub oo muujinaya in si khaldan dambi la iigu xukumay:**

Fadlan calaamadee sanduuq kasta ee oraah kasta oo run ah. Waad calaamadin kartaa ilaa inta sanduuq ee aad u baahantahay. Haddii aysan midna ku khusaynin, calaamadee sanduuqa ay ku qorantahay, "Hadallada kor ku xusan midkoodna aniga ima khuseeyo."

- ☐ Markhaati/basaas igu markhaati furay ayaa ka noqday ama beddelay markhaatifurkiisii.

- ☐ Waxaa jirta cadayn cusub oo xaqiijinaysa in aanan dambi gelin taas oo aan la heli karin markii la i maxkamadeeyey ama aan galay qirashadayda.

  Si kooban u sharax faahfaahinta caddaynta:

  ________________________________

  ________________________________

  ________________________________

- ☐ Waxaa jirta cadayn cusub oo muujinaysa in maxkamadayntaydu ahayd mid aan cadaalad ahayn caddayntaas oo aan la heli karin markii la i maxkamadeeyey ama aan galay qirashadayda.

  Si kooban u sharax faahfaahinta caddaynta:

  ________________________________

  ________________________________

  ________________________________

- [ ] Maxkamadeyntayda waxaa la sameeyey markhaatifur saynis ku salaysan oo khaldanaa ama la buriyey.

  Si kooban u sharax markhaatifurka:

  ______________________________

  ______________________________

  ______________________________

- [ ] Kiiskayga waxaa ku jira DNA aan marnaba la baarin.

- [ ] Sarkaal ku lug lahaa kiiskayga ayaa mar dambe la ogaaday in uusan daacad ahayn, eexday, ama musuqmaasuq sameeyey.

  Magaca sarkaalka:

- [ ] Qoraallada kor ku xusan midkoodna aniga ima khuseeyo.

**Sheegashadaada in Dambi si Khaldan Laguugu Xukumay**

1. Fadlan noo sheeg sababta aad u aaminsan tahay in si khaldan laguugu xukumay dambiga ama dambiyada:

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

2. Xagee ayaad joogtay wakhtigaas dambiga ama dambiyadu ay dhaceen?

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

3. Ayo, ama maxay, ayaa caddayn kara meesha aad joogtay xiligii uu dambigu dhacay?

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

4. Miyaad haysaa macluumaad ku saabsan qofka laga yaabo inuu dambiga galay?

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

_______________________________________________

5. Ayaa haya macluumaad muujin kara in si khaldan dambi laguugu xukumay?

Magaca: _______________________________________________

Cinwaanka iyo Lambarka Telefoonka: _______________________________

Qofkani muxuu ogyahay? _______________________________________

_______________________________________________

Qofkani miyuu ka markhaati furay maxkamadaynta?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

Magaca: _______________________________________________

Cinwaanka Guriga: _____________________________________

Qofkani muxuu ogyahay? _______________________________________

_______________________________________________

Qofkani miyuu ka markhaati furay maxkamadaynta?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

Magaca: _______________________________________________

Cinwaanka Guriga: _____________________________________

Qofkani muxuu ogyahay? _______________________________________

_______________________________________________

Qofkani miyuu ka markhaati furay maxkamadaynta?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

Magaca: _______________________________________________

Cinwaanka Guriga: _____________________________________

Qofkani muxuu ogyahay? _______________________________________

_______________________________________________

Qofkani miyuu ka markhaati furay maxkamadaynta?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

6. Haddii aad aaminsantahay in maxkamadayntaadu aysan caddaalad ahayn, fadlan sharax sababta:

________________________________________

________________________________________

________________________________________

7. Macluumaad kale oo noocee ah ayaa naga caawin kara inaan wax ka ogaano kiiskaaga?

________________________________________

________________________________________

________________________________________

________________________________________

Marka aan saxiixo Arjigan, waxaan ka codsanayaa Cutubka Dib u Eegista Xukunka, oo ah waax ka mid ah Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Minnesota, inay dib u eegaan xukunkayga. Waxaan fahamsanahay inaan macluumaadkan siinayo xafiiska dacwad ooge. Waxaan fahamsanahay in Minnesota CRU aysan aniga i matalin oo aysan i matali karin. Taas bedelkeeda, CRU ayaa i caawin karta iyada oo si iskaashi ah u baaraysa kiiskayga kuna talinaysa in tallaabo la qaado si loo saxo caddaalad darro.

Waxaan caddaynayaa in macluumaadka kujira arjigani ay run yihiin sida ugu fiican ee ogaalkayga ah.

Saxiixa: ________________________ Taariikhda: ____________________

Magaca oo Daabacan: ____________________________________

Please return completed form to:

Office of Minnesota Attorney General Keith Ellison
Attn: Conviction Review Unit
445 Minnesota Street
Suite 1400
St. Paul, MN 55101